


Sidan ayaad CV:ga u samaynaysaa

Macluumaadka shakhsiga

- Xusuusnow, in xarafka koowaad ee magacyada oo dhan aad ka dhigto xaraf weyn!
- Xusuusnow, in aad hubiso in lambarka telefoonkaada iyo iimaylkaadu ay sax yihiin!
- Waxaad sidoo kale ku dari kartaa sawir aragti wanaagsan adiga kaa bixinaya.
- Waxaad billowga hore ku qori kartaa qoraal gaaban oo aad uga hadlayso naftaada iyo nooca ay tahay shaqada aad raadinayso.

 <p>CV</p> <p>Etunimi Sukunimi 045 123 4567 email@gmail.com</p> <p>Valmistun pian varastohoitajaksi ja etsin kokopäiväistä työtä varasto-työntekijänä. Minua kiinnostaa erityisesti terminaalityöntekijän työ. Työntekijänä olen luotettava, huolellinen ja yhteistyökykyinen.</p> <p>17.3.2022</p>	
KOULUTUS	<p>09/2020– Stadin Ammattiopisto Logistiikka-alan perustutkinto Opiskelen varastohoitajaksi. Arvioitu valmistuminen 05/2022.</p> <p>2018–2019 AmiEdu Toimitilahuoltaja</p>
TYÖKOKEMUS	<p>02/2022– Vuokrafirma Oy Varastotyöntekijä Teen keikkatyötä opintojen ohessa. Tehtäviini kuuluu tuotteiden keräily ja pakkaaminen.</p> <p>09/2021–12/2021 Varasto ABC Oy Harjoittelija Tehtäviini kuului tavarain vastaanottaminen, hyllytys ja avustavat tehtävät. Työtodistuksessani minua on keuhuttu tehokkaaksi ja järjestelmälliseksi.</p>
KURSSIT JA KORTIT	B-ajokortti Trukkikortti Työturvallisuuskortti (voimassa 1.12.2023) suomen Kielen opintoja 2016–2017
KIELITAITO	suomi – hyvä suullinen, tyydyttävä kirjallinen arabia – äidinkieli englantti – perusteet
IT-TAIDOT	Perustaidot tietokoneen käytössä: internet, sähköposti ja Word.
HARRASTUKSET	Käyn kuntosalilla, pelaan jalkapalloa ja harrastan ruoanlaittoa.
SUOSITTELIJAT	Varastoiesimies Pekka Pomo 050 000 0000 pekka@varastoabc.com

Waxbarashada

- U qor liiska waxbarashadaada qaab ah, in waxbarashadaadi ugu dambaysay ay liiska ugu horreyso.
- Qor magaca dugsiga iyo shahaadada.
- Haddii ay waxbarashadaadu weli tahay qabyo, qor wakhtiga aad qalinjebinayso.

Waaya-aragimada shaqada

- U qor liiska waaya-aragimadaada shaqada qaab ah, in tii ugu dambaysay ay liiska ugu horreyso
- Haddii aad hadda shaqaysa, waxaad taariikhda ay shaqadu dhammaanayso ka dhigi kartaa mid furan.
- Xusuusnow in aad ka taxaddarto wakhtiyada ay shaqooyinku billowdeen iyo wakhtiyada ay dhammaadeen. Haddii loo baahdo ka hubso tusaale ahaan shahaadadaada shaqada.

Koorasyada iyo kaararka

- Liis ku qor koorasyada iyo kaararka aad qaadatay tusaale ahaan laysinka baabuurta iyo kaarka gargaarka degdegga ah.
- Haddii ay kaarkaada ku qorantahay taariikh uu dhacayo, sheeg taariikhda.

Aqoonta luqadeed

- Sharraxaad ka bixi heerkaada aqooneed ee luqadaha kala duwan tusaale ahaan haddii uu yahay: afkaada hooyo, aad u taqaan si fiican, si meel-dhexaad ah, si billow ah.

Aqoonta IT (Cilmiga kombuyuutarka)

- Qor liiska barnaamijyada kombuyuutarka ee aad isticmaali taqaan?
- Haddii aadan si fiican u isticmaali aqoonin kombuyuutarka, waad sheegi kartaa ama qaybtaas waad ka gudbi kartaa.

Hiwaayadaha

- Waxaad sidoo kale sheegi kartaa hiwaayadahaada. Waxay taasi kaa caawinaysaa in aad dadka ka dhex muuqato!

Dadka talo kaa bixinaya

- Waxaa kuu wanaagsan in dhammaadka CV:ga aad ku sheegto qofka ammaan iyo talo kaa bixinaya, kaas oo uu shaqo-bixiyuhu la xiriiri karo isla-markaasna weydiin karo faahfaahin dheeraad ah oo adiga kugu saabsan.
- Xusuusnow, in qofka talada kaa bixinaya aad weydiisato oggolaanshaha ah, in aad macluumaadkiisa ku darsato qoraalkaada!
- Talo-ka-bixiye waxaa noqon kara tusaale ahaan madaxdaada, macallinkaada ama hagaha naadiga hiwaayadda.

- CV yacni qoraalka qof ka warranku wuxuu sheegayaa waxa aad taqaan, nooca ay waxbarashadaadu tahay iyo shaqooyinki aad soo qabatay.

- Marka aad shaqo codsanayso, inta badan waa in aad codsiga shaqada raacisaa CV:gaada.

- CV waa qoraal 1–2 bog ah. Waa muhiim in dhammaan waxyaabaha halkaas lagu qoray ay sax yihiin.

- CV:ga wanaagsan wuxuu kaa caawinayaa samaynta dareenka koowaad oo wanaagsan!

6 Aika

Vipuvoimaa
EU:lta
2014–2020

